

# Goorta la xidho maaskaro inta lagu jiro COVID-19

9/14/2021

Maadaama nooca Delta la ogaaday inuu si sahlan u faafo, waxaa muhiim ah inaad xirato maaskaro xaaladaha qaarkood si aad u badbaadiso naftaada iyo bulshadaada.

## Qof walba, xitaa haddii lagu tallaalo:

**Dadka si buuxda loo tallaalay iyo kuwa aan la tallaalin labadaba** waa inay xirtaan **maaskaro xaaladaha soo socda**:

- Ganacsiyada gudaha loo galaayo iyo goobaha dadwaynaha iyo meelaha banaanka ee dadku ka buuxaan ee ay suuragal tahay, in cudurku aad ugu dhex faafo. **Tan waxaa ka mid ah ku xirashada maaskaro masaajidda, kaniisadaha iyo suuqyada dhaqanka.**
  - Haddii aad leedahay nidaam difaac oo daciif ah, ama aad halis dheeraad ah ugu jirto cudur daran oo ka yimaada COVID-19, tixgeli inaad xirato maaskaro.
  - Haddii aad la nooshahay ama aad si joogto ah ula joogto qof difaaciisu liito, aan talaalka buuxa qaadan, ama khatar wayn ugu jira inuu xanuun daran ka qaado COVID-19, iskuday inaad xirato maaskaro markaad joogto gudaha goobaha dadwaynaha ama meelaha banaanka ee dadka badan joogaan.
- Goobaha ay COVID-19 si fudud ugu faafi karto, ama meelaha ay dadku aad ugu xanuunsan karaan COVID-19, sida dugsiyada, goobaha daryeelka caafimaadka, hoyga hoylaaweyaasha, iyo xarumaha dhaqan-celinta.

## Dadka aan talaalka qaadan:

**Qof kasta oo** aan si buuxda loo tallaalin, oo ay ku jiraan carruurta da'doodu tahay 2 iyo ka weyn, waa inuu sii wadaa inuu ku xidho maaskaraha wejiga si fiican ula eg goobaha soo socda:

- Gudaha ganacsiyada iyo xarumaha dadwaynaha
- Markay la joogaan dadka ka yimid qoysaska kale
- Markay joogaan banaanka ee aan dadku kala fogaan karin

Xaaladaha qaarkood, adeegsiga maaskarooyinka ayaan macquul noqon karin, caawimaado kale oo badqab leh ayaana la tixgelin karaa.



Minnesota Department of Health | [health.mn.gov](http://health.mn.gov) | 651-201-5000  
625 Robert Street North PO Box 64975, St. Paul, MN 55164-0975

La xiriiir [health.communications@state.mn.us](mailto:health.communications@state.mn.us) si aad u weydiisato qaab kale. (Somali)